

FAAFINTA

الرسمية



RASMIGA AH

الجريدة

JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad Muqdisho

1da Juunyo 1979 L. 6

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanad-kii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta uxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

K O O B N I I N

Q A Y B T A K O O W A A D

SHARCI

SHARCI L. 17 ee 16 Maajo 1979, Heshiis Amaahda ee dhexmaray J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ah, kuna saabsan Mashruuc Kaalmo Farsamo

Bog 400

LAW N. 17 on 16th May 1979, The Development Gredit Agreement between the Somali Democ ratic Republic and the International Develop ment Association

» 401

SHARCI L. 18 ee 16 Maajo 79, Heshiiska Amaahda iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar

» 402

Wakaaladda Madbadda Qaranka — Muqdisho

LAW N. 18 on 16 May 79, The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association	» 403
SHARCI L. 19 ee 16 Maajo 1979, Heshiiska Amaah- da ee dhexmaray J. D.S. iyo Hay'adda Caala- miga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mash- ruuca Dekedda.	» 404
LAW No. 19 on 16 May 1979, The Development Credit Agreement between the Somali Democ- ratic Republic and International Development Association.	» 405
SHARCI L. 20 ee 1 Maajo 1979, Sharciga Habayn- ta Waxbarashada Shaqaalaha.	» 406
SHARCI L. 21 ee 3 Juunyo 1979, Cafis ku saabsan Markabka MV Lord Bayro.	» 409

Q A Y B T A L A B A A D

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L 26 Feb 1979 Wax ka beddelid Qaabka dhismaha Maamul- ka D. Hoose	» 410
XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L 27 ee 21 Feb- raayo 1979, in shaqada D. Hoose ee Xamar loo qoro Jaalle Maxamuud Xasan Maxamed	» 412
XEER MADAXWEYNAHA L. D. S. L 28 ee 21 Feb- raayo 1979, Magacaabid Agaasimayaal cusub.	» 414
WASAARADDA GAR IYO ARR DIINTA L. 29 ee 12 Maajo 1979, ku wareejin Beeraha maxaa- biista qaarkood	» 416
WASAARADDA GAR. IYO ARR. DIINTA L. 30 ee 12 Maajo 1979, wareejinta u dhis Iskaasha- tada waayo arag	» 417

QAYBTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI L. 17 ee 16 Maajo 1979, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah kuna saabsan Mashruuc kaalmo Farsamo.

M A D A X W E Y N A H A
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Meelmarin Heshiis

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luuliyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) kuna saabsan Mashruuca Kaamo Farsamo (Technical Assistance Project), laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 10ka Maajo 1979.

Wuxuu soo saarayaa sharciga soo socda :

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Kaalmo Farsamo laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun, 1978 waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah; waxaanna lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 16 Maajo 1979

SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

M A D A X W E Y N A H A

LAW No. 17 on 16th May 1979 The Development Gredit Agreemt
reement between the Somali Democratic Republic and the
International Development Association

President of the Somali Democratic Republic

INSTRUMENT OF RATIFICATION

HAVING SEEN : The 1st., 2nd. and 3rd. Charter of October
21st. Revolution, 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1,17,18 and 19 of 1st. July, 1976.

HAVING SEEN : The Devalopment Credit Agreemant (Technical Assistance Freject) between the Somali Democratic Republic and the International Development Assocnacation (IDA), signed on 30th June 1978 at Columbis, United State s of America.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and
that of Council of Ministers on 10th MAY 1979.

Herebypromalges the following law :-

Article I

The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association signed on Columbia, United States of America in 30th June 1978, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Muqdishu, 16.5.1979.

**MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDNT OF THE**

Somali Democratic Republic

SHARCI L. 18 ee 16 Maajo 79, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray J. D. Soomaaliyed iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar.-

*M A D A X W E Y N A H A
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

MEELMARIN HESHIIS

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kaacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Shariiyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luuliy, 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarta (IDA) kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar, laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirradda ee 10ka Maajo, 1979.

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :-

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun 19778, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya astaan sharci ah; waxaanna lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya

Muqdisho 16 Maajo 1979

*SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE
M A D A X W E Y N A H A*

J . D . S .

LAW. N. 18 on 16 May 79, The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association.-

*PRESIDNT
OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC
INSTRUMENT OF RATIFICATION*

HAVING SEEN : The 1st, 2nd. and 3rd. Charter of October 21st Revolution, 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1,17,18, and 19 of 1st. July 1976.

HAVING SEEN : The Development Credit Agreement (Mogadishu Water Supply Project) between the Somali Democratic Republic and the International Development Association (IDA), sigen at Columbia, USA, on 30th June 1978.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers on 10th May 1979.

Hereby promulgates the following Law :

Article I

The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association signed on 30th June, 1978 at Columbia, USA, is Hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Rep; and shal be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Muqdisho 16 Maajo 1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

*PRESIDENT OFF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC*

SHARCI L. 19 x 16 Maajo 1979, Heshiiska Amaahda ee dhixmaray J. D. Soomaaliyeed iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Dekedda.

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

Meelmarin Heshiis

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kaacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhixmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) kuna saabsan Mashruuca Dekedda (fourth port project), laguna kala saxeexday Columbia. USA, 23kii Ogosto, 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 10ka Maajo, 1979.

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :-

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhixmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Dekedda laguna kala saxeexday Columbia, USA, 23kii Ogosto 1978, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, waxaana lagu saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 16 Maajo 1979

SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

LAW. N. 19 on 16th May 79, The Development Credit Agreement between Somali Democratic Republic, and the International Development Association.-

*PRESIDNT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC*

Instrument of ratification

HAVING SEEN : The 1st, 2nd. and 3rd. Charter of October 21st Revolution, 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1,17,18, and 19 of 1st. July 1976.

Having Seen : The Development Credit Agreement (fourth port project) between the Somali Democratic Republic and the International Development Association (IDA), signed on 23rd August, 1978 at Columia, United States of America.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers on 10th May 1979.

Hereby promulgates the following Law:-

Article I

The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association signed on 23rd Agust, 1978 at Columbia, USA, is Hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Muqdisho, 16.5.1979

*MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDENT OF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC*

SHARCIGA L. 20 ee 1 Maajo 1979 Habaynta Waxbarashada Shaqaalaha

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo 3aad ee Ka-caanka 21 Oktoobar 1969

MARKUU ARKAY : Sharciga Jaamacadda L. 72 ee 7. 9. 1977 iyo Xeerka Jaamacadda L. 93 ee 7. 9. 1977;

ISAGOO AQOONSAN : Baahida loo qabo in la dejijo sharcii habaynaya waxbarashada shaqaalaha;

ISAGOO TIXGELINAAYO : Go'aanka Golaha Dhexe ee XHKS

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCI SOO SOCDA :-

Qodobka 1aad

- 1) Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb qaa-taan waxbarashada Jaamacadda iyo dhammaan ma-caahidda sare ee dalka, iyadoo loogu talagalayo 10% ti-rada ardada loo qaadanayo Jaamacadda Ummadda san-nad walba.
- 2) Tirada kore, waxaa weheliya 200/250 Shaqaalaha ma-callimiinta ah ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Bar-baarinta ee Sannad walba gelaya kulliyadda waxbara-shada.

Qod 2aad

Shaqaaluhu waxaa kaloo ay si buuxda uga qayb gelayaan Waxbarashada dibedeed oo u qaybsan :

- b) Waxbarasho heer jaamacadeed ee maadooyinka la xiriira Xirfadaha iyo aqoonta hay'ad waliba u baahan tahay si hawlaheeda loo horumariyo aanse dalka laga heli karin;
- t) waxbarasho takhasus sare oo la xiriirta baahida hay'-adaha dawladda ee cudud shaqaale oo aqoon sare leh;
- j) waxbarasho heer dhexe oo lagu soo qaadanayo dugsiyo iyo macaahid sare ee farsamo oo aan dalka laga heli karin lana xiriirta baahida hay'adaha;
- x) tababarro gaagaaban oo kor loogu qaadayo aqoonta xir-fadeed ee qofka shaqaalaha ah;

Qodobka 3aad

Habka lagu maamulayo deeqaha shaqaalaha :

- b) Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare aaya wadajir u xaddidaya qaybta hay'ad walba laga siinayo waxbarashada Jaamacadda Ummadda Laba bil ka hor inta ayan bilaaban waxbarashada Jaamacaddu, taasoo ku soo bixi doonta wareegto Madaxweyne;
- t) deeqaha waxbarashada dibadeed heer kastoo ay yihiin, waxaa qaybinaysa Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sre iyadoo tixgelinsa baahida iyo qorshaha hay'adaha dawladda;
- j) si loo sugo caddaaladda iyo sinnaanta waxaa xulitaanka qofka la siinayo deeqda ka qaybgelayo wadajirna u saxiiyaya magacaabiddiisa Madaxda hay'adda, Unugga Xisbiga iyo Guddiga Dhewe ee Shaqaalaha.

Qodobka 4aad

Habka loo raacayo dadka ay soo magacaabayaan Ururrada Bulshadu waa sida soo socota :-

- b) inay noqdaan dad u go'ay hawlaha ururrada sida xubnaha guddiyada fulinta iyo hawladeennadooda;
- t) waxay kaloo Ururradu soo magacaabi karaan xubnaha kale ee Ururrada ee si muuqata oo firfircoo uga soo qeybgalay hawlaha bulshada ugu yaraan saddex sano;
- j) dadka deeqda la siinayo waxaa wadajir u soo magacaabaya guddiyada fulinta ee Ururrada Bulshada.

Qodobka 5aad

Qofka la siinayo deeq waxbarasho heer kastoo ay tahay, waa inuu oofiyaa shuruudaha soo socda :-

- b) inuu yahay qof hawlkar ah, dadaal iyo himmad leh lana hubo kacaannimadiisa iyo xilkasnimadiisa iydoo mudnaan gaara la siinayo shaqaalaha kaasoo hal-

gamay Ururrada Bulshada iyo dhallinyarada xisbiyiinta ah;

- t) inuu haysto shahaadada waxbarasho ee lagu gelo karo Kuliyadda, Machadka ama hay'adda waxbarasho ee loo doonayo uuna leeyahay saldhig waxbarasho oo uu uga bixi karo nooca waxbarashada loo doonayo.
- j) inaan da'disu ka weynaan 30 (soddon) sano hadduu bilaabayo waxbarasho jaamacadeed;
- x) inuusan hayn xil shaqo oo gaarsiisan Agaasime Waax ama wax u dhigma;
- kh) inuu soo hayay shaqada dawladda ugu yaraan saddex sano oo taxan;
- d) inuu soo maray tababarka Dugsiga Xalane iyo shaqada Qaranka hadduu bilaabayo waxbarasho Jaamacadeed;
- r) qofka shaqaalahi ah ee hore u dhammeeyay waxbarasho jaamacadeed waxaa u furan oo keliya takhasus sare, mana bilaabi karo waxbarasho maaddo cusub oo heer jaamacadeed.

Qodobka 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqangeliyaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.
Muqdisho 1 Maajo 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J. D. S.

SHARCI L. 21 ee 3 Juunyo 1979, Cafis ku saabsan Markabka
MV LORD Bayron.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda Koowaad labaad iyo sadde-
xaad ee Kacaanka; 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb. 1, 17, 18, iyo 19 1da Luul-
yo 1976;

MARKUU ARKAY: Qod. 149 XC iyo 255 XHC;

MARKUU ARKAY: Xukunka Maxkamadda Badbaadada Dal-
ka Lamb. 69/76, taariikh 9. 4. 1976, xukunkaasoo lagu
aquoonsaday in markabka «MV LORD BAYRON» uu galay
denbiga ku xusan Qod. 1aad, Qaybtiisa 2aad ee Sharciga
Lamb. yahay 15, soona baxay 15kii Abriil 1974;

MARKUU TIXGELIYEH: codciyadii isdabajoogga ahaa ee
Dowladda Giriigga, kuna saabsanaa in xal siyaasadeed iyo
saaxiibtinnimo lagu dhammeeyo xaaladda Markabka MW
LORD BAYRON;

MARKUU TIXGELIYEH: Warbixintii Guddoomiyaha Guddi-
ga Qorshaha Qaranka, kuna saabsanayd wadahadalladii uu
kula yeeshay ATENE madax ka tirsan Dowladda Giriigga;

ISAGOO TIXGELINAAYA: xurmeynta Mabaadi'da iskaadhi-
ga, isu soo dhawaashaho, iyo wax wada qabsiga dawliga ah;

WUXUU KA CAFIYEH

Markabka MV LORD BAYRON ciqaabta ku xusan xukunka
MBD Lambar 69/76, ee 9ka Abriile 1976;

ISLA MARKAANA

Wuxuu amrayaa in laga siidaayo xayiraaddii lagu hayey
markabka isaga ah.

Muqdisho 3 Juunyo 1979

*MADAXWEYNAHA J. D. S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 26 ee 17 Febraayo 1979,
Wax ka beddelaad Qaabka Dhismaha Maamulka D/Hoose

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Wax ka beddelaad Qaabka Dhismaha Maamulka D/Hoose;

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-
caanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lam. yahay 21 ee 3. 2. 1977, Qo-
dobkiisa 5aad, Xarafka 2aad

ISAGOOGARKAY : Xeerka lam. yahay 86 ee 23. 8. 1977 iyo kan
lam. yahay 50 ee 14. 1. 78, kuwaas oo wax looga toosiyey
Xeerka Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOOGARKAY : Xeerka lambarkiisu yahay 28 biis 21.2.76,
kaas oo lagu Dhaqoo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOOG HUBSADEY : in loo baahan yahay in wax laga bed-
delo Qaabka Dhismaha Maamulka D/Hoose.

ISAGOOG OGAADAY : baahida loo qabo Abuurida jagooyin
cusub iyo Toosin Jagoooyinkii hore.

ISAGOOG DHEGEYSTAY : Tala jeedinta Duqa Magaalada
Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Toosin

Waxaa lagama maarmaan Noqotay in wax laga beddelo
ama laga toosiyo jagoooyinkii hore ugu jiray Xeerka shaqaalaha
D/Hoose ee Muqdisho, waxaana loo toosiyey sida soo socota :

XAFIISKA DUQA MAGAALADA

1 — Faracii Xoghaynta Xafiiska Duqa
Magaalada waxaa loo beddelay :

Jago lam. 00002 | Xubinta Xoghaynta Gaar ahaaneed oo
Duqa Magaalada Muqdisho «A5»

WAAXDA CAAFIMAADKA

2 — Laantii Nadaafadda Guud ee Waaxda
Caafimaadka waxaa loo beddelay :

Jago lam. 30052 Xubinta Nadaafadda Guud, waxayna hoos
 imaan doontaa Waaxda Arrimaha Ij-
 timaaciga ee D/Hoose, «A5»

XAFIISKA GARYAQAAANKA D/HOOSE,

Jago lam. 00010 Xafiiska Garyaqaaanka D/Hoose oo horay
 darajadiisu u ahayd «A6» waxaa da-
 radiisa laga dhigay «A3»

XAFIISKA ARR. DIBEDDA & XIRIIRKA DADWEYNAHA
4 — Xubintii hore ee Xiriirka Dadweynaha
 waxaa loo beddelay :-

Jago lam. 10033 Waaxda Xiriirka Dadweynaha, waxayna
 hoos imaan doontaa Duqa Magaala-
 da Muqdisho, isla markaasina yeelan
 doontaa Laba Laamood oo kala ah: A3

Jago lam. 10034/1 B — Laanta Qoraalka & Dukumontooyinka
 «A6»

Jago lam. 10035/1 T — Laanta Dacwooyinka Dadweynaha
 «A6»

5 WAAXDA ARR. IJTIMAACIGA

Jago lam. 31322. Laantii Beeraha iyo Dhirta, waxaa loo be-
 ddelay : Xubinta Beeraha iyo Dhirta «A6»

6 WAAXDA GANACSIGA

Jago lam. 20404 Laantii Badarka waxaa loo beddelay : Xu-
 binta Badarka «A6»

7 WAAXDA CANSHUURAH

Faracyadii 14ka Degmo ee waaxda
kor ku xusan waxaa loo bedelay :

Jago lam. 20080/94 Laamaha 14ka Degmo, ee D/Hoose «A6»

**QODOOKA 2AAD
ABUURID JAGOOGYIN CUSUB**

Waxaa Maamulka D/Hoose oo Muqdisho lagama maarmaan u noqotay in qaabkii dhismaha shaqaalaha lagu kordhiyo Jagoojin Cusub, taasoo ay keentay baahsanaanta iyo Ballaarka Hawlaha kala duwan ee D/Hoose ku daryeelayso bulsho weynta ku nool Gobolka Banaadir, Jagoojinka cusub ee la abuurayna waa kuwa soo socda :

1 — WAAXDA CANSHUURAHA

waxaa loo Abuuray :

Jago. lam. 20.911. Xubinta Canshuuraadka kala duwan «A6»

2 — WAAXDA DAD-DHIGIDDA

Waxaa loo Abuuray :

Jago lam. 31543/1. Faraca Arkiifiyada B 2

3 — KU/HAA DUQA MAGAALADA EE MAAMULKA GUUD

Waxaa loo Abuuray :

Jago. lam. 10.103/1. Xubinta Kormeerka Guud «A5»

4 — WAAXDA CAAFIMAADKA

Waxaa loo Abuuray :

Jago. Lam. 31544/1. Faraca la degaalanka Cayayaanka B2
Qodobka 3aad

Qodobada Xeerkani ka kooban yahay waxaa lagu kordhin doonaa Xeerkha hore ee lamb. yahay 28 biis ee 21. 2. 1976, kaa-soo lagu Maamulo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Saxiibo Madaxweynaha J. D. S. iyada oo aan qodobadiisa waxba laga bedelin, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

W A X A A S A X I I X A Y

MADAXWEYNAYA J. D. S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas»

Xubin Golaha Dhexe XHKS

Ahna Duqa Magaalada Muqdisho

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay

Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 23

Muqdisho 12 Maajo 1969

Hantidhawraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA J D. S. L. 27 ee 21 Febraayo 1979, In
Shaqada D/Hoose ee Xamar loo qoro Jaalle Maxamuud Xa-
san Maxamed

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiinwaanka Lambar. 3 bogga lamb. 25
Muqdisho 12 Maajo 1979
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Ka-
caanka 21kii Oktoobar 1969,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lam. yahay 28 biis ee 21. 2. 1976,
iyo Beddelaadii ka dambaysay.

ISAGOO ARKAY : wareegtada lam. yahay 6/1/12/14650 ee
30. 10.1978, kana soo baxday Wasaaradda shaqada iyo Ar-
rimaha Bulshada, ee lagu qaybiyey Ardayda Shaqada Qa-
ranka qaybta 7aad 1978 iyo dalabkii ka horeyey ee D/Hoose

ISAGOO HUBSADAY : in D/Hoose ee Xamar uu kaga soo aa-
day Ardayga la qaybiyey Jaalle Maxamuud Xasan Maxa-
med lagama maarmaana ay tahay in shaqaaleyiisa lagu
qaato darajada B4 Sarkaal Fuliye sida Sharcigu tilmaama-
yo.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

In Shaqada D/Hoose ee Xamar loo qoro Jaalle Maxamuud
Xasan Maxamed Xuseen oo ka mid ahaa Ardayda Shaqada Qa-
ranka ee lagu soo qaybiyey D/Hoose laguna qaato darajada B4
Sarkaal Fuliye, isagoo buuxinayaa Jago lam. 30670 Mushaarkii-
suna wuxuu noqonayaa 450/= shilin bishiiba, Shaqo u qoriddu
waxay ka bilaabatay 1. 9. 1978

Qodobka 2aad

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiibo Madaxweynaha J D. S. iyada oo aan qodobadiisa waxba laga beddelin, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

WAXAA SAXIIXAY

*MADAXWEYNAHA J. D. S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas»
Xubin Golaha Dhexe XHKS*

Ahna Duqa Magaalada Muqdisho

Waan aragnay ee Diiwaangelinay

Muqdisho 12 Maajo 1969

Hantidhawraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

Diiwaanka lamb. 3 bogga lamb. 25

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L 28 ee 21 Febraayo 1979,
Magacaabid Agaasimayaal Cusub

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaanshida 1aad, 2aad iyo tañ 3aad ee Ka-
caanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lam. yahay 28 biis ee 21. 2. 1976,
iyo Beddelaadii ka dambaysay, ee lagu dhaqo shaqaalaha
D/Hoose ee Xamar.

ISAGOO U ARKAY: lagama in la magacaabo Agaasimeyaal
Cusub, maadaama Maalinba Maalinta ka dambaysa uu sii
Ballaaranayo Culayska Hawlaha kala duwan ee D/Hoose
ugu danayso Dadweynaha ku nool G/Banaadir.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Tala jeedinta Duqa Magaalada
Muqdisho

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Laga billaabo markii Madaxweynaha . D. S. uu soo Saxii-
xo Xeerkaan waxaa Jaallayaasha lagu Magacaabay mid walba
jagada Magaciisa ku hor qoran :

- 1) Jaalle Maxamed Cabdulle «Garjeex» Jago lam-
bar 10033 Agaasimaha Waaxda X. Dadweynaha
- 2) Jaalle Cabdiraxmaan Aadan «Ilka dheere» Jago lam-
bar 31154 Agaasimaha Waaxda Arri. Ijtimaaciga
- 3) Jaalle Maxamed Nuur Cadde Jago lam-
bar Agaasimaha Waaxda Qorshaynta

Qodobka 2aad

Jaallayaasha lagu Magacaabay Xilka Cusub waxay ku Mu-shaar qaadaan doonaan Darajooyinkoodi hore, hase yeeshee wa-xay xaq u leeyihiin Cunnada Xilka iyo Guriga oo agada Agaa-simimada.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markii uu soo Saxiixo Ma-daxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dalka J.D. Soomaaliya

Muqdisho 21.2.79

W A X A A S A X I I X A Y

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

*Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas)
Xubin Golaha Dhexe XHKS
Ahna Duqa Magaalada Muqdisho*

Waan aragnay ee Diinwaangelinnay
Diinwaanka lamb 3 bogga lamb. 24

Muqdisho 12 Maajo 1979
Hantidhawrka Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur.

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO ARR. DIINTA
L.29 ee 12 Maajo 1979 ku Wareejin Beeraha Maxaabiista qaarkood

J.D.S.

WASIIRKA

WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kaacaanka;

ISAGOO AQOONSAN : baahida kordhintaa wax soo saarka dalka;

ISAGOO TIXGELINAYAA : inay tahal lagama maarmaan in laga wado Xabsiga Dhexe ee Xamar dadka qaarkood lana geeyo, meel kale;

ISAGOO TIXGELINAYAA : talada Taliyaha Ciidaanka Asluubta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Dekreetadaa soo socota :

Qodobka 1aad

Waxaa go'aan lagu gaaray in dadka qaarkood ee ku jira Xabsiga Dhexe la geeyo beeraha Dawladda ee Ciidanaka Asluubta uu gacanta ku hayo si ay uga qayb qaataan kordhintaa tacab soo saarka beerahaas, ayagana lagu daaweyo, maadaama ay bulsho ahaan u bukaan.

Qodobka 2aad

Go'yinta tirada dadka la geeynayo beeraha waxaa awood u leh Taliyaha Ciidanka Asluubta.

Qodobka 3aad

Dekreetadan waxay dhaqan geleysaa markii uu saxiixo Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Maajo 1979

WASIIRKA

WASAARADDA GARSOORKA IYO ARRIMAHAD DIINTA

Dr. Axmed Shire Maxamuud

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO ARR. DIINTA L. 30
ee 12 Maajo 1979 ku wareejinta u dhis Iskaashatada Waayyo arag
ku wareejinta u dhis Iskaashatada waayo arag

J. D. S.

WASIIRKA GARSOORKA ARRIMAHADIIINTA

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, tii 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka;

ISAGOO TIXGELINAYAA : maslaxada guud ee Qaranaka;

ISAGOO TIXGELINAYAA : talada Guddoomiyaha Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaaschatooyinka Soomaaliyeed iyo Taliyaha Ciidanka Asluubta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Dekreetada soo socota :

Qodobka 1aad

Waxaa go'aan lagu gaaray in Iskaashatada Waayo arag oo hadda ka hor gacanta ugu jirtay Ciidamada Asluubta, lagu wareejiyo Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Wareejinta Iskaashatada waxaa la raaca wareejinta wixii maaliyad, qalab iyo shaqaale ee ay leedahay Iskaashatadu.

Qodobka 3aad

Dekreetadan waxay dhaqan geleysaa markii uu saxiixo Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Maajo 1979

***WASIIRKA
WASAARADDA GARSOORKA IYO ARR. DIINTA***

Dr. Axmed Shire Maxamuud